# Xuquuqda Isku-dhafka ah ee Minnesota iyo Federaalka ee Daryeelka Hospice-ka

### XUQUUQDA DARYEELKA HOSPICE-KA EE MINNESOTA SIDA UU QABO XEERKA MINNESOTA144A.751

## Fasiraadda iyo Dhaqan-gelinta Xuquuqda

Xuquuqda ku xusan qaybtan waxaa loo dejiyey faa'iidada dadka hela daryeelka hospice-ka. Bixiyaha hospice-ka ma ka dalban karo qof inuu ka tanaasulo xuquuqdan si uu u helo adeegyada hospice-ka. Ilaaliye sharciyeed ama mas'uul hantiyeed ama, haddii aanu jirin ilaaliye ama mas'uul, qof loo magacaabay ayaa codsan kara in xuquuqdan la dhaqan-geliyo. Bayaankan xuquuqdu ma beddelayo mana yaraynayo xuquuqaha kale iyo xorriyadaha laga yaabo inay khuseeyaan dadka hela daryeelka hospice-ka, dadka bixiya daryeelka hospice-ka, ama bixiyeyaasha hospice-ka ee shatiga ku haysta Xeerka Minnesota , qaybta 144A.753 Shatiga (https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144A.753).

## Bayaanka Xuquuqda

Qoraalka **farta madow ku qoran** wuxuu matalaa xuquuqo dheeraad ah oo macaamiisha ah sida uu dhigayo sharciga federaalka ee bukaannada hela adeegyada hospice-ka ee ay shahaadaysay Medicare.

Xeerka Minnesota , qaybta 144A.751 Xuquuqda Daryeelka Hospice-ka (https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144A.751)

Qofka hela daryeelka hospice-ka waxa uu xaq u leeyahay inuu:

**In lagu wargeliyo xuquuqdiisa/deeda, waxaana waajib ku ah hospice-ka inuu ilaaliyo oo taageero ku dhaqanka xuquuqdan.**

1. Ku dhaqmo **xuquuqdiisa/deeda isagoo ah bukaanka hospice-ka.** Helo macluumaad qoraal ah oo ku saabsan xuquuqdiisa/deeda ka hor inta uusan helin daryeelka hospice-ka ama inta lagu jiro booqashada qiimaynta hore inta aan la bilaabin daryeelka hospice-ka, oo ay ku jirto waxa la samaynayo haddii xuquuqdu la jabiyo. **Ogeysiiska xuquuqda iyo waajibaadka: (1) Inta lagu jiro booqashada qiimaynta hore ka hor bixinta daryeelka, hospice-ka waa inuu siiyaa bukaanka ama wakiilka ogeysiis afka ah (taasoo micnaheedu yahay hadal) iyo qoraal ah oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka bukaanka, kuna qoran luuqad iyo qaab uu bukaanku fahmi karo; (2) Hospice-ka waa inuu u hoggaansamaa shuruudaha qayb-hoosaadka I ee qaybta Code of Federal Regulations (CFR) 489 ee cutubkan ee ku saabsan awaamiirta hore (advance directives). Hospice-ka waa inuu bukaanka u sheego oo u qaybiyo macluumaad qoraal ah oo ku saabsan siyaasadaha hospice-ka ee awaamiirta hore, oo ay ku jirto sharaxaad ku saabsan sharciga gobolka ee khuseeya; (3) Hospice-ka waa inuu helo saxiixa bukaanka ama wakiilka oo xaqiijinaya inuu helay nuqulka.**
2. Helo daryeel iyo adeegyo la waafajiyay qorshe daryeel hospice oo ku habboon, isla markaana waafaqsan heerarka la aqbalay ee daryeelka hospice-ka, iyo inuu ka qaybqaato si firfircoon samaynta, beddelidda, iyo qiimaynta qorshaha iyo adeegyada. **Ka qaybqaato samaynta qorshaha daryeelka hospice-ka.**

3. In loo sheego ka hor inta aanu helin daryeelka adeegyada la siin doono, qaybaha kala duwan ee howl-wadeenada bixiya daryeelka, inta jeer ee booqashooyinka la qorsheeyay, doorashooyinka kale ee jira, iyo cawaaqibka doorashooyinkaas, oo ay ku jiraan cawaaqibka ka iman kara diidmada adeegyadaas.
4. In horay loo sheego, markasta oo ay suurtogal tahay, wixii isbeddel ah ee ku yimaadda qorshaha daryeelka hospice-ka, isla markaana uu si firfircoon uga qayb qaato isbeddel kasta.
5. Diidi karo daryeel, adeegyo ama daawayn.
6. Horay u ogaan karo xaddidaadaha adeegyada uu bixiyo adeeg-bixiyuhu, iyo sababaha uu adeeg-bixiyuhu ugu joojin karo adeegyada. **Helo macluumaad ku saabsan baaxadda adeegyada uu hospice-ku bixin doono iyo xaddidaadaha gaarka ah ee adeegyadaas.**
7. Horay u ogaan karo ka hor inta aanu helin daryeelka haddii adeegyada hospice-ka dabooli karaan caymis caafimaad, gargaar caafimaad, Medicare, ama barnaamijyada kale ee caafimaad ee uu ku jiro. **Helo macluumaad ku saabsan adeegyada uu daboolayo faa'iidada hospice-ka.**
8. Helo, marka uu codsado, qiyaas daacad ah oo ku saabsan lacagta magdhawga ah ee bixiyaha ka filayo inuu ka helo shirkadda caymiska caafimaadka ee uu ku jiro. Qiyaas daacad ah waa in sidoo kale la siiyaa qof aan ku jirin shirkad caymis caafimaad haddii uu codsado. Macluumaadkan lacag-bixinta ma aha qiyaas sharci ahaan ku waajibaysa oo ku saabsan kharashka adeegyada.
9. Ogaan karo in laga yaabo inay jiraan adeegyo kale oo bulshada dhexdeeda laga heli karo, oo ay ku jiraan adeegyada kale ee daryeelka dhamaadka nolosha iyo bixiyeyaasha kale ee hospice-ka, isla markaana uu ogaado meesha uu ka heli karo macluumaad ku saabsan adeegyadaas.
10. Si xor ah u dooran karo bixiyeyaasha jira, isla markaana uu beddeli karo bixiyaha ka dib marka adeegyada la bilaabo, iyadoo ay xaddidan tahay waxa ay oggol yihiin caymiska caafimaad, gargaar caafimaad, Medicare, ama barnaamijyada kale ee caafimaad. Doorto dhakhtarkiisa/keeda gaarka ah ee daryeelka**.**
11. In macluumaadkiisa shakhsiga ah, maaliyadeed, iyo caafimaad la ilaaliyo oo loo daayo qarsoodi, iyo in lala wargeliyo siyaasadaha iyo habraacyada bixiyaha ee la xiriira shaacinta xogta noocaas ah.
12. In loo oggolaado inuu helo diiwaannada iyo macluumaadka qoraalka ah ee ku jira diiwaannada, sida ku cad qaybaha 144.291 ilaa 144.298**. Inuu yeesho diiwaan caafimaad oo qarsoodi ah. Helitaanka ama sii deynta macluumaadka bukaanka iyo diiwaannada caafimaadka waxaa loo oggol yahay si waafaqsan 45 CFR qaybaha 160 iyo 164.**
13. Inuu helo adeeg ay bixiyaan shaqaale si habboon loo tababaray oo karti u leh gudashada waajibaadkooda.
14. In loola dhaqmo si edeb leh oo ixtiraam leh, isla markaana hantida bukaanka loola dhaqmo si ixtiraam leh. In hantidiisa iyo jirkiisaba loola dhaqmo si ixtiraam leh.
15. Inuu cabasho ka dhiiban karo daryeelka ama adeegyada la bixiyay ama aan la bixin, ama ku saabsan ixtiraam darro ama edebdarro loo muujiyay bukaanka ama hantida **bukaanka qof kasta oo adeegyo ku bixinaya magaca hospice-ka. Bukaanku wuxuu xaq u leeyahay inaan lagu samayn takoorid ama aargoosi sababtoo ah wuxuu isticmaalay xuquuqdiisa/deeda.**
16. Inuu ka xoroobo jirdil jireed iyo aflagaaddo afka ah. **Inuu ka xoroobo si xun ula dhaqan, dayacaad, ama aflagaaddo afka ah, maskaxeed, galmo, iyo jireed, oo ay ku jiraan dhaawacyo aan la garanayn halka ay ka yimaadeen, iyo ku takri-falka hantida bukaanka.**

17. Inuu helo ogeysiis macquul ah oo hore oo ku saabsan isbeddelada adeegyada ama khidmadaha, oo ay ku jiraan ugu yaraan toban maalmood oo ogeysiis hore ah marka bixiyuhu joojinayo adeeg, marka laga reebo xaaladaha halkaas oo:
    a. qaataha adeegga uu ku dhaqmo si beddela xaaladaha shaqo ee u dhexeeya bixiyaha hospice-ka iyo shaqsiga bixiya adeegyada hospice-ka ama abuura jawi shaqo oo aflagaaddo ah ama aan ammaan ahayn shaqsiga bixiya adeegyada hospice-ka.
    b. degdeg ku yimid daryeel-bixiyaha aan rasmiga ahayn ama isbeddel weyn oo ku dhacay xaaladda qaataha adeegga ay keeneen baahiyo adeeg oo ka badan heshiiska adeeg-bixiyaha ee hadda jira, oo aan si ammaan ah loogu dabooli karin bixiyaha hospice-ka.
    c. qaataha adeegga aanu sii ahaan shahaado ahaan u cuslayn oo cudurkiisa uusan mar dambe loo tixgelin inay tahay xaalad dhimasho dhow.
18. Inuu helo wareejin isku-duuban marka uu dhici doono isbeddel ku yimaadda bixiyaha adeegyada.
19. Inuu ogaado sida loola xiriiro shaqsi ka tirsan bixiyaha oo mas'uul ka ah xallinta dhibaatooyinka, iyo in bixiyaha baaro oo isku dayo inuu xalliyo cabashada ama dacwadda.
20. Inuu ogaado magaca iyo cinwaanka hay'adda gobolka ama degmada ee lala xiriiro si loo helo macluumaad ama gargaar dheeraad ah.
21. Inuu xuquuqdan ku dhaqmo naftiisa, ama qoyska bukaanka hospice-ku ay ku dhaqmaan haddii bukaanka lagu go'aamiyo inuusan awood u lahayn, iyada oo aan lagu ciqaabin. **Haddii maxkamad awood sharci leh oo gobolka ahi ay go'aamiso in bukaanku aanu karti lahayn sida uu dhigayo sharciga gobolka, xuquuqda bukaanka waxaa ku dhaqmaya qofka loo magacaabay si uu ugu matalo bukaanka sida uu dhigayo sharciga gobolka. Haddii maxkamad goboleed aysan go'aamin in bukaanku aanu karti lahayn, wakiil sharciyeed kasta oo uu bukaanku magacaabay si waafaqsan sharciga gobolka ayaa ku dhaqmi kara xuquuqda bukaanka inta uu oggol yahay sharciga gobolka.**
22. In lagu maareeyo xanuunka iyo astaamaha heerka uu bukaanku doorbido ee raaxada, oo ay ku jiraan hubinta in daawooyinka ku habboon si fudud loogu heli karo bukaanka. **Inuu hospice-ka siiyo maarayn wax ku ool ah oo xanuunka iyo xakamaynta astaamaha la xiriira cudurka dhimashada dhow**.
23. Inuu joojin karo doorashada hospice-ka wakhti kasta.
24. Inuu helo daawayn bogsiin ah oo ku saabsan xaalad kasta oo aan la xiriirin cudurka u qalmeeyay daryeelka hospice-ka, isaga oo weli ku jira doorashada hospice-ka, isla markaana lala kaashanayo bixiyaha hospice-ka haddii ay suurtogal tahay.

**Hospice-ka waa inuu:**

- **Hubiyaa in dhammaan xadgudubyada la soo sheegay ee la xiriira si xun ula dhaqan, dayacaad, ama aflagaaddo afka ah, maskaxeed, galmo, iyo jireed, oo ay ku jiraan dhaawacyo aan la garanayn halka ay ka yimaadeen, iyo ku takri-falka hantida bukaanka ee uu sameeyo qof kasta oo adeeg ku bixinaya magaca hospice-ka, ay si degdeg ah shaqaalaha hospice-ka iyo shaqaalaha qandaraaska ahi ugu soo sheegaan maamulaha hospice-ka.**
- **Si degdeg ah u baaro dhammaan xadgudubyada la soo sheegay ee ku lug leh qof kasta oo adeeg ku bixinaya magaca hospice-ka, isla markaana si degdeg ah u qaado tallaabooyin looga hortagayo xadgudubyo kale oo dhici kara inta lagu jiro xaqiijinta xadgudubka la sheegay. Baaritaannada iyo/ama**

**diiwaangelinta dhammaan xadgudubyada la soo sheegay waa in loo sameeyaa si waafaqsan habraacyada la dejiyey.**

- **Qaado tallaabo saxitaan oo ku habboon si waafaqsan sharciga gobolka haddii xadgudubka la sheegay ay xaqiijiyaan maamulka hospice-ka ama hay'ad dibadeed oo awood sharci leh, sida hay'adda gobolka ee kormeerka ama hay'adda fulinta sharciga ee deegaanka.**
- **Hubiyaa in xadgudubyada la xaqiijiyey loo gudbiyo hay'adaha gobolka iyo deegaanka ee awoodda u leh (oo ay ku jirto hay'adda gobolka ee sahanka iyo shahaadaynta) muddo shan maalmood oo shaqo gudahood ah laga bilaabo marka la ogaado xadgudubka.**

Haddii bixiyaha hospice-ka maamulo xarun hospice oo la deggan yahay, ogeysiiska qoraalka ah ee la siinayo bukaan kasta oo deggan xarunta hospice-ka waa inuu ku jiraa tirada iyo aqoonta shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha iyo mutadawiciinta, ee bixiyuhu shaqaaleysiiyey si loo buuxiyo shuruudaha Xeerka Minnesota 4664.0390 ee shaqo-wareeg kasta oo ka jira xarunta hospice-ka la deggan yahay.

## Shaacinta

Nuqul ka mid ah xuquuqdan waa in la siiyaa qofka marka la bilaabayo daryeelka hospice-ka. Nuqulka waa inuu ku jiraa cinwaanka iyo lambarka taleefanka ee Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints) iyo Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer (Office of Ombudsman for Long-Term Care), iyo bayaan kooban oo sharxaya sida cabasho looga gudbiyo xafiisyadan. Macluumaadka ku saabsan sida loola xiriiro Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer waa in sidoo kale lagu daraa ogeysiisyada isbeddelka khidmadaha bixiyaha iyo ogeysiisyada ay bixiyeyaasha hospice-ku ku bilaabayaan wareejinta ama joojinta adeegyada.

## Ilooyin

Haddii aad qabto cabasho ku saabsan hay'adda ama qofka ku siinaya adeegyada hospice-ka, waxaad wici kartaa, u qori kartaa ama booqan kartaa Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints), Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health), ama Xarunta Warbixinta Xadgudubka Dadka Waaweyn ee Minnesota (Minnesota Adult Abuse Reporting Center). Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer (Ombudsman for Long-Term Care).

**Office of Health Facility Complaints (Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka)**
(651) 201-4200/1-800-369-7994
health.ohfc-complaints@state.mn.us
Cinwaanka Boostada:
Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
P.O. Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970

**MINNESOTA ADULT ABUSE REPORTING CENTER (MAARC) Xarunta Warbixinta Xadgudubka Dadka Waaweyn ee Minnesota (MAARC)**
1-844-880-1574
Adult protection / Minnesota Department of Human Services (Ilaalinta Dadka Waaweyn / Waaxda Adeegyada

Dadweynaha ee Minnesota)
Minnesota's Adult Protective Services (https://mn.gov/dhs/people-we-serve/seniors/services/adult-protection/))

**OFFICE OF OMBUDSMAN FOR LONG-TERM CARE (Xafiiska Difaaca Xuquuqda Daryeelka Mudada Dheer)**
PO Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971
1-800-657-3591 or 651-431-2555 (metro)
Office of Ombudsman for Long-Term Care (https://mn.gov/ooltc/)
MBA.OOLTC@state.mn.us

**Medicare Beneficiary and Family Centered Care Quality Improvement Organization (Hay'adda Horumarinta Tayada Daryeelka ee Medicare ee Ku Saleysan Bukaanka iyo Qoyska)**
Commence Health (ooh ore loogu yiqiinay LIVANTA LLC)
BFCC-QIO Program
Commence Health
PO Box 2687 Virginia Beach, VA 23450
1-888-524-9900, TTY 7-1-1

Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Minnesota)
Health Regulation Division (Qaybta Xeerarka Caafimaadka)
PO Box 64900
St. Paul, MN 55164-0900
651-201-4200
health.fpc-licensing@state.mn.us
www.health.state.mn.us

05/06/2026

*Si macluumaadkan loogu helo qaab kale, wacl: 651-201-4200.*